Adeegga Cilmi-nafsiga Waxbarashada ee Enfield waa bixiyaha ugu weyn ee adeegyada cilmi-nafsiga siiya dugsiyada Enfield iyo goobaha waxbarashada sanadaha hore. Waxaan xiriir toos ah la leenahay adeegyada waxbarashada, caafimaadka iyo daryeelka bulshada kuwaas oo kor u qaadaya hab isku duwaridan.

EPS ENFIELD Educational Psychology Service

## Waa maxay Dhakhtarka Cilmi-nafsiga Waxbarashada?

Dhakhtarka Cilmi-nafsiga Waxbarashada (EP) waa khabiir cilmi-nafsi ka shaqeeya oo tababaran oo haysta shahaadada digriiga ee cilmi-nafsiga iyo tababar xirfadeed oo cilmi-nafsiga waxbarashada ah oo heer Mastaris ama Dhoctarayd ah. Waxay isticmaalaan aqoontooda cilmi-nafsiga si ay u horumariyaan guusha waxbarashada iyo si ay u wanaajiyaan fursadaha nolosha ee carruurta iyo dhallinyarada.

EP-yadu waxay ku shaqeeyaan heerar kala duwan si ay gacan uga gaystaan inay isbedel sameeyaan. Waxaana ka mid ah in aqoonta cilmi-nafsiga lagu dabaqo:

- **Hoggaamiyeyaasha nidaamka heer qaran, heer gobol ama heer degmo**, taageerida siyaasadda iyo horumarka istaraatiijiyadeed. Tani waxay ku lug yeelan kartaa in la sameeyo cilmi baaris waxqabadeed.
- **Dugsiyada ama goobaha waxbarasho** si loo taageero hirgelinta hababka ururka iyo horumarka, tusaale ahaan; habka dadaalada dugsiga ee xagga badqabka; shaqaalaha in lagu tababaro hababka otisimka; in caawiyayaasha macalimiinta lagu tababaro barnaamijyada lagu taageerayo badqabka shucuureed (ELSA) iwm.
- **Kooxaha waalidiinta ama daryeelayaasha** ee meelaha la wadaago si loo siiyo caawimaad, tusaale ahaan, aqoon-is-weydaarsiyo ama barnaamijyo waxqabad ah oo ku aadan mowduucyo ay ka mid yihiin otisimka ama koritaanka shucuureed ee carruurta.
- **Kooxaha carruurta iyo dhallinyarada** ee meelaha la wadaago si loo siiyo caawimaad, tusaale ahaan, aqoon-is-weydaarsiyo ama barnaamijyo waxqabad ah oo ku aadan maaraynta walwalka, u diyaar garowga imtixaannada ama taageeridda walaalaha carruurta otisimka qaba.
- **Carruurta gaarka ah iyo dadka da'da yar iyo qoysaskooda** marka ay jiraan walaacyo ku saabsan waxbarashadooda, korriismadooda, badqabkooda shucuureed ama habdhaqankooda. Waxay la shaqeeyaan xirfadlayaasha kale ee la shaqeynaya ilmaha ama qofka da'da yar iyo goobta waxbarashada canuga (tusaale ahaan, dugsiga barbaarinta, dugsiga xanaanada, dugsiyada caadiga ah, kuleejka ama meelaha lagu bixiyo xirfadaha takhasuska ah). EP-yada waxay gacan ka gaystaan aqoonsashada rabitaanka, hamiga iyo waxyaabaha ay ku wanaagsan yihiin carruurta/dhallinyerada iyo sidoo kale baahiyahooda. Macluumaadkan waxaa loo isticmaalaa in macne loogu yeelo waxa socda iyo in lagu raadiyo habab lagu caawiyo ilmaha ama qofka dhallinyarada ah.






**Taleefan: 020 8379 2000**
**Iimayl: EPS@enfield.gov.uk**
**@ENFIELDEPS**

**www.enfield.gov.uk**


ENFIELD Council

## Goorma ayay EP-yadu ku lug yeeshaan ilmo ama qof dhalinyaro ah?

Carruurta, dadka da'da yar iyo qoysaskoodu waxay xaq u leeyihiin inay taageero ka helaan Dhakhtarka Cilmi-nafsiga Waxbarashada ee Enfield marka mid ka mid ah shuruudaha la buuxiyo:

- haddii ilmaha ama qofka dhalinyerada ah uu dhigto Dugsi Enfield oo iibsaday Adeegga Cilmi-nafsiga Waxbarashada
- haddii adeegga SEN uu talo waydiisto Adeegga Cilmi-nafsiga Waxbarashada iyada oo qayb ka ah Qiimaynta Caafimaadka iyo Baahiyaha Daryeelka Waxbarashada ama si loo taageero Qorshaha Caafimaadka iyo Daryeelka Waxbarashadaee ilmaha ama qofka dhalinyerada ah
- haddii ilmaha ama qofka dhalinyarada ah loo gudbiyo koox kale oo taageero ka codsata Dhakhtarka Cilmi-nafsiga Waxbarashada, tusaale ahaan HEART

Goobaha waxbarashada waxay inta badan dabooli karaan baahiyaha carruurta ama dhalinyarada intooda badan, laakiin haddii waalidiinta ama daryeelayaashu ay ka walaacsan yihiin waxbarashada, badqabka ama caafimaadka maskaxda ee ilmahooda, badanaa waxay marka hore la hadlaan goobta. Goobaha waxbarasho ayaa waxay masuuliyadoodu tahay inay dhagaystaan walaacyada ay qabaan waalidiinta iyo daryeelayaasha waxaana laga yaabaa inay adiga kula diyaariyaan 'Qorshaha Taageerada Waxbarashada' ama 'Qorshaha Waxbarashada Shakhsi-ahaaneed'. Qorshaha waxaa ku jiri doona meelaha ay tahay in hormar laga sameeyo, natiijooyinka suurtagalka ah iyo taageerada lagaaga caawin doona dugsiga iyo guriga. Waxaad la kulmi doontaa dugsiga si aad dib u eegis ugu wada samaysaan qorshaha iyo horumarka uu ilmahaaga samaynayo. Inta lagu jiro hannaankan, dugsiga ama goobta waxbarashadu waxaa laga yaabaa inay u baahdaan inay Dhakhtarka Cilmi-nafsiga Waxbarashada ka soo qeybgeliyaan si uu u bixiyo fikrado iyo taageero dheeraad ah. Dugsiyadu waxay iibsadaan adeegan waxayna mudnaanta u siiyaan si waafaqsan baahida carruurta dhigata dugsigooda.

Enfield EPS sidoo kale waxay leeyihiin khadka taageerada taleefanka oo loogu talagalay waalid kasta ama daryeele kasta oo ku nool Enfield ama canugiisa uu dhigto dugsiga Enfield. Khadkani waa mid qarsoodi ah oo loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha inay uga hadlaan walaac kasta oo ay ka qabaan badqabka, waxbarashada ama habdhaqanka ilmahooda. In macluumaadka loo gudbiyo adeegyada kale ee ku habboon ayaa sidoo kale ah wax laga heli karo halkaan.

## Maxay EP-yadu qabtaan?

Marka laga hadlayo shaqada la xiriirta carruurta ama dhalinyarada, EP-yadu waxay la shaqeeyaan dadka waaweyn ee sida fiican u yaqaana ilmaha ama qofka dhalinyarada ah si ay u fahmaan meelaha ay ku fiican yihiin iyo meelaha ay baahiyo ka jiraan. Waxay sidoo kale shaqada cilmi-nafsiga la samayn karaa ilmaha ama qofka dhalinyerada ah. Iyadoo la wada shaqeeynayo, EP-ga wuxuu gacan ka gaysan doonaa qorshaynta tillaabooyinka xiga si loo taageero badqabka shucuureed iyo waxbarashada ilmaha.

## Sidee ayay u sameeyaan?

EP-yadu waxay qaban karaan shaqooyin kala duwan oo ay ka mid yihiin:

- La-talinta iyo talooyin la siiyo dugsiyada iyo goobaha waxbarashada
- Qiimeyn nafsiyeed oo shakhsi-ahaaneed oo lagu sameeyo carruurta/dhalinyarada
- La shaqaynta hay'adaha kale
- Waxqabadyo ay ka mid yihiin taageerada teerabiyada
- Baritaanka xirfaddaha ee shaqaalaha waxbarashada
- Bixinta taageerada waalidiinta ama daryeelayaasha

## Sideen uga lug yeelan doonaa?

EP-ga had iyo jeer wuxuu ogolaansho qoraal ah ka heli doonaa waalidiinta ama daryeelayaasha, iyo dhalinyarada da'doodu ka weyn tahay 16 sano, kahor intuusan ku lug yeelan arrinta.

EP-yada waxaa ka go'an inay waalidiinta iyo daryeelayaasha iyo carruurta iyo dhalinyarada ka qayb geliyaan dhammaan go'aannada la gaarayo. EP-yadu waxay u shaqeeyaan si wadajir ah oo iskaashi leh maadaama la aqoonsan yahay in waalidiinta iyo daryeelayaasha iyo shaqaalaha waxbarashadu ay si fiican u yaqaaniin ilmaha ama qofka dhalinyarada ah.

Guudmar/warbixin qoraal ah ayaa la bixiyaa marka shaqo toos ah uu qabto EP-ga. Haddi EP-yadu ay ka qeybgalayaan kulanka dib u eegista dugsiga, dugsigu waxa uu inta badan bixin doonaa diiwaanka qoran ama Qorsheynta Waxbarashada Shakhsiyeed ee la cusboonaysiiyay ama Qorshaha Taageerada Waxbarashada.

## Sideen ula xiriiri karaa Adeegga EP?

Taleefan: 020 8379 2000

Iimayl: **EPS@enfield.gov.uk**

Wax badan ka ogow Enfield EPS:

Booqo: **Xarunta Adeegyada Ganacsiga ee Dugsiyada Enfield**

@ENFIELDEPS